



Farrintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Oktoobar 20, 2022

Ku socota: Shaqaalaha Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, ODDS
Ujeedada Deeqda lacageed ee Soo celinta Awoodda iyo Ballaarinta ayaa hadda u furan codsiyada

Deeqda lacageed ee Soo celinta Awoodda iyo Ballaarinta ee sida aadka ah loo sugayay, iyada oo qayb ka ah Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka (ARPA), ayaa hadda u furan soo jeedinta.

COVID-19 wuxuu saameyn xun ku yeeshay awoodda dhammaan adeegyada ka tirsan nidaamka naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD). Maalgelintani waxay taageeri doontaa mashaariicda iyada oo jawaab u ah saameynta xun ee COVID-19 u leeyahay awoodda dhammaan adeegyada ka tirsan nidaamka ODDS.

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) waxay soo jeedinta deeqda lacageed ka codsanaysaa dadka wax soo jeediya ee ka tirsan fursadaha qaybta adeega ee federaal ahaan la ansixiyay ee soo socda.

- Maalgelinta bilawga ah/dib u dhiska loogu talagalay shaqaaleynta bixiyayaasha taageerada hawlaha maalintii.
- Maalgelinta bilawga ah, tababarka iyo iyo taageerada farsamo ee loogu talagalay adeeg bixiyayaasha dhaqan ahaan iyo luqad ahaan u gaarka ah ee dhammaan adeegyada;
- Ballaarinta iyo kobcinta dhammaan adeegyada loogu talagalay dadka leh baahiyaha dhanka taageerada ee ugu sarreysa;
- Maalgelinta diiradda wax lagu saarayo si loo ballaariyo awoodda dhulka miyiga ah; iyo

- Maalgelinta bilawga ah ee dhammaan noocyada kale ee hay'adaha daryeelka bixiya.

[Fadlan boogo ku dhawaaqida deeqdayadii lacageed](#) wixii la xiriira taariikhaha iyo wakhtiga loo qabtay dhammaan Codsiga Soo jeedinta Deeqda lacageed (RFGP) iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan Kulanka Soo Jeedinta Ka hor.

Soo jeedinta waa in la soo gudbiyaa iyada oo la adeegsanayo [OregonBuys](#), kaas oo ah nidaamka wax iibsiga elektarooniga ah ee gobolka. Fadlan iska diiwaan geli OregonBuys, haddii aadan sidaa horeba u sameynin. Marka la galo, ka raadi codsiyada furan oo hel #S-10000-00004865 si aad u aragto Codsiyada Soo jeedinta Deeqda lacageed oo buuxa.

Deeqo badan oo ah ARPA ayaa u furmi doona soo jeedinta dhawaan. [Bogga internet-ka ee ARPA](#) ayaa laga dhigay mid la cusbooneysiisay oo leh macluumaadka deeqda lacageed ee ugu dambeeyay.

Dhammaan su'aalaha ku saabsan fursadan maalgalinede waa in la aadaa meesha kaliya ee lagala xiriirayo RFGP, Russell Brammer, oo laga helo Russell.Brammer@dhsosha.state.or.us. Haddii aad hayso su'aalaha ARPA oo guud, fadlan la xiriir ODDSARPA.funding@odhsosha.oregon.gov.

Waad ku mahadsan tahay in aad daneeyso deeqda lacageed ee ARPA iyo fikradahaaga hal-abuurka leh si loo taageero dadka reer Oregon ee qaba I/DD.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com or www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.